KU DHAQAN XAFIIS D.

# Faafin Rasmi ah

EE JUMHURIYADDA DIMUQRADIKA SOMALIYA

**Sanadka I** Muqdisho, 28 Maggio 1973 **L. 8**

Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah
ee ka tirsan Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka

FAAFIN BIL SOO BAXA

**QIIMADU:** waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA:** Sanadii waa Sh. 100 Samaliya gudeheeda — dibaddedana waa Shs. 300. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qoritaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba shilin — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

## KOOBNIIN

## BOGGA KOOWAAD

### SHARCIYO

W. M.

## BOGGA LABAAD

### XEER DOWLADEED

XEER GUDDOONSHAHA GOLAHA SARE EEE KACAANKA, 3 Febbraio 1973 — *Magacaau Xoghayeyaal Guddio Gobollo. L. 46.* Bog. 108

XEER GUDDOONSHAHA GOLAHA SARE EEE KACAANKA, 24 Aprile 1973 — *Garsooreyaal loo beddelo Xaffiska Xeer Ilaaiiyaha. L. 47.* » 109

XEER WASAARADDA GARSOORKA IYO DIINTA, 14 Aprile 1973 — *Magacaabid Asasoorayaasha (Corte Assise) Maxkamadda Rafcaanka Gobolka Waqooyi Galbeed. L. 48.* » 111

XEER WASAARADDA ARIMAHA GUDAHA, 14 Maggio 1973 — *Magacaau Guddoomiyeyaal Guddio Degmo. L. 49.* » 113

Madhacada Dawladda — Muqdisho

# BOGGA SEDDEXAAD

## TALOOYIN, ISGARSIIN, OGEYSIIS, IYO WAXII LA MID AH

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeiisis Baddalaad Naado Dhul, 15 Maggio 1973 — *Jaalle Cabdullahi Shek Iusuf. L. 53.* Bog. 115

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeiisis Baddalaad Naado Dhul, 16 Maggio 1973 — *Asha Moxamed Jama. L. 54.* » 116

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeiisis Baddalaad Naado Dhul, 16 Maggio 1973 — *Samandari Ursula. L. 55.* » 116

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeiisis Baddalaad Naado Dhul, 16 Maggio 1973 —*Sharif Cumar Moxamed. L. 56.* » 117

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis Naada Dhul, 19 Maggio 1973 — *Cali Barre Jama. L. 57.* » 117

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis Naada Dhul, 19 Maggio 1973 — *Moxamud Moxamed Xasan iyo Moxamud Cali Abtidon. L. 58.* » 118

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis Naada Dhul, 19 Maggio 1973 — *Xalima Axme Cali. L. 59.* » 118

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis Naada Dhul, 19 Maggio 1973 — *Fadumo Cumar Xafed. L. 60.* » 119

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis Naada Dhul, 19 Maggio 1973 — *Cabduraxaman Xaji Diriye. L. 61.* » 120

DUQA MAGAALADA XAMAR, 20 Maggio 1973 — *Wuxuu Dejinayaa Xeer soo Socda. L. 62.* » 121

IMMOBILIARE SOMALA S.p.A. - I.S.S.A., 26 Maggio 1973 —*Ogeysiis isu imaatin Guudnimo oo caadi ah. L. 63.* » 125

LIBAH - S.R.I. - Oo Saldhigeedu yahay Kismaio 26 Maggio 1973 — *Ogeysiis isu imaatin Guudnimo oo Caadi ah. L. 64.* » 125

MORODI - S.p.A. - Oo Saldhigeedu yahay Muqdisho 26 Maggio 1973 — *Ogeysiis isu Imaatin Guudnimo oo Caadi ah. L. 65.* Bog. 126

SOCIETA' INCREMENTO PRODUZIONI AGRICOLE - S.p.A. - 26 Maggio 1973 — *Ogeysiis isu imatin Guudnimo oo Cadi ah. L. 66.* » 127

A.S.E.I. - AZIENDA SOMALA ELETTRO INDUSTRIALE S.p.A. - 26 Maggio 1973 — *Ogeysiis isu Imatin Guudnimo oo Caadi ah. L. 67.* » 128

SOCIETA' AGRICOLA BULO MERERTA - SABUM - S.p.A. - 26 Maggio 1973 — *Ogeysiis isu Imaatin Guudnimo oo Caadi ah. L. 68.* » 129

SHIRKADDA HILIBKA EE SOPRAL - S.p.A. - 26 Maggio 1973 — *Ogeysiis isu imaatin Guudnimo oo Caadi ah. L. 69.* » 130

MAXKAMADDA GOBOLKA BENADIR, 10 Maggio 1973 — *Jegge Lambarisu yahay 4692 So. 500, Nagta la yiraxdo Xalima Salex Naaji. L. 70.* » 131

# BOGGA KOOBAAD
W.M.

---

# BOGGA LABAAD
## XEER DOWLADEED

**XEER GUDDOONSHAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA**

**3 Febbraio 1973, L. 46.**

**Magacaau Xoghayayaal Guddio Gobollo.**

GUDDOONSHAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

ASAGOO ARKAY Xaashidii 1d iyo 2d Kacaanka 21 October 1969;

ASAGOO ARKAY Qodobka 9d ee Xeerka lambarkiisu yabay 52 lona soo scaray 8dii bisha pun 1972;

ASAGOO TIXGELINAYA Tilsentii Xoghayaha Dawladda ee Arrimaha Gudaha;

ASAGOO OGAADAY Baahida loo qabo in Xoghayeyaal loo magacaanbo Guddiyada Gobollada Tog-Dheer, Jubada Hoose, Bari (Bosaso) iyo Nugaal.

WUXUU GOOYAY

Qodobka 1d

In saraakiisha hoos lagu sbeegay ay ka noqdaan Xoghayeyaal Guddiyada Gobollada magacyadooda, ku dhinac qoran:

1. — Moxamed Xaji Cadnan — Xoghayaha Guddiga Gobolka Tog-Dheed;
2. — Cabdulle Maxamud Maxad — Xoghaha Guddigo Gobolka Jubbada Hoose;
3. — Cali Roble Farax — Xoghayaha Guddiga Gobolka Bari (Bosaso);
4. — Cali Shekh Xaydar — Xoghayaha Guddiga Gobolka Nugaal.

Qodobka 2d

Go'aankani si degdeg ah buu u dhaqan geli waana in lagu qoro Faafinta Rarsmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 3 Febbraio 1973.

GUDDOOMIYAHA
GOLAHA SARE EEE KACAANKA
*S. Gaas Maxamed Siyad Barre*

Xoghayaha Dawladda ee Arrimaha Gudaha
*S. Guuto Xusen Kulmiyo Afrax*

*VISTO e registrato - Reg. n. 2, foglio n. 92.*
*Mogadiscio, li 21 Maggio 1973.*
*Il Magistrato ai Conti:*
Magg. ABDULLAHI WARSAME NUR

---

**XEER GUDDOONSHAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA**
**24 Aprile 1973, L. 47.**
**Garsooreyaal lfi beddelo Xafiska Xeer Ilaalyaha.**

GOLAHA SARE EE KACAANKA
MADAXTOOYADA

MARKUU ARKAY Xaa shidii koowaad iyo tii labaad ee Kacaanka;

MARKUU ARKEY Sharciga tiradiisu tahay 1 ee 25kii Oktobar, 1969;

MARKUU ARKEY Dikrii tiro 12 ee Oktobar, 1969 ee Golaha Sare ee Kacaanka;

MARKUU ARKEY Dikrii sharciyedd tiro 3 ee 12kii Jun 1962 Sharciga Nidaamka Maxkamadaha iyo Beddelaadihii lagu sameeyey;

FIIRINAYA inay meelo Xeer Ilaaliye Guud ku Xigeeni ka bannaanyihiin Xafiiska Xeee Ilaaliyaha Guud loona baahanyahay in la buuxiyo;

FIIRINAYAA Taladii Xoghayaha Wasaaradda Garsoorka iyo Diinta;

## DIKRIIS

In Garsooreyaasha hoos ku magacaaban loo beddelo Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud iyagoo noqon doona Xeer Ilaaliye Guud ku Xigeeno laguna magacaabo mid walba meesha magaciisa ku kor qoran:

1. — Cabdullahi Cosoble Barre — Xeer Ilaaye Guud Ku Xigeen Galbeed — Hargeysa.
2. — Muse Cali Cilmi — Xeer Ilaaliye Guud ku Xigeen — Xamar.
3. — Ibrahim Muse Xasan — Xeer Ilaaliye Guud ku Xigeen Gobolka Jubbada.
4. — Cabduraxman Cusman Cumar — Xeer Ilaaliye Guud ku Xigxn Gobolka Jubaada Hoose.
5. — Yusuf Gedi Muse — Xeer Ilaaliye Guud ku Xigeen Gobolka Mudug.
6. — Cali Axmed Xasan — Xeer Ilaaliye Guud ku Xigeen Qaybta Shareecada Xamar.

Muqdisho, 24 Aprile 1973.

*Sareeye Gaas Moxamed Siyad Barre*
MADAXWEYNAHA
GOLOHA SARE EE KACAANKA

Xoghayaha Wasaaradda Garsoorka
iyo Arrimaha Diinta
*Dr. Cabdisalam Shekh Xusenzzz*

*VISTO e Reristrato - Reg. n. 2, foglio n. 57.*
*Mogadiscio, li 7 Maggio 1973.*
*Il Magistrato ai Conti:*
Magg. CABDILAHI W. NUR

**XEER WASAARADDA GARSOORKA DIINTA**

**14 Aprile 1973, L. 48.**

**Magacaabid Asasoorayaasha Maxamadda Rafcaanka (Corte Assise) ee Gobalka W. Galbeed.**

WASAARADDA GARSOORKA IYO AA. DIINTA

XOGHAYAHA DAWLADDA

ANNAGOO ARAGNAY Warqaddii Kowaad ee Kacaanka;

ANNAGOO ARAGNAY Xeerkii soo baxay 21kii Oktober 1969, Lamb. 1;

ANNAGOO ARAGNAY Xeerkii soo baxay 3dii Jun 1962, Lamb.

14, ee Nidaamka Dawladda iyo beddelaatkii ka dambeeyey;

ANNAGOO ARAGNAY Qodobka 26naad, fqrada 1waad, ee Dekreettadii Tashriiciga ahayd 12-6-1962, Lamb. 3 ee Nidaamka Qadaha.

XEER

Qodobka 1

Jaallayaasha aynu kusoo sheegi doonnno hoos, waxaa loo magacaabay inay noqdaan Asasoorayaasha Maxkamadda Corte Assise ee Refcaaanka, Gobalka Waqooyi Galbeed, Hargeysa, Sannadkan 1973:

1. Maxamed Warsama Fido
2. Cabdiraxman Xaji Bashir
3. Maxamed Diriye Ileye
4. Aden Jibril Amin
5. Axmed Farax Axmed
6. Axmed Maxamed Cawaleh
7. Cabdiraxman Maxamed Farole

8. Xusen Ismail Yusuf
9. Cabdullahi Xusen
10. Axmed Ismacil Erig
11. Nur Salex Maxamed
12. Maxamed Cabdulllahi Xersi
13. Maxamed Cabdullahi Axmed
14. Maxamed Magan Guled
15. Maxamed Abukar Xaji
16. Maxamed Xusen Cabdikarim
17. Cusman Ibrahim Axmed
18. Cabdi Cilmi Gaalle
19. Xasan Cali Xirry
20. Cali Xasan Yusuf
21. Yusuf Cabdi Sacid
22. Sh. Muse Jamac Godad
23. Sacid Ibrahim Muse
24. Zeinab Sayid Cusman.

Qodobka 2

Dekreetadani hadda ayeey ka billaaban.

Muqdisho, 14 Aprile 1973.

*Jaalle, Dr. Cabdisalam Sheekh Xusen*
Xoghayaha Dawladda
Wasaaradda Garsoorka iyo Diinta

**XEER WASAARADDA ARIMAHA GUDAHA**

**14 Magio 1973, L. 49.**

**Magacaau Guddoomiyeyaal Guddiyo Degmo.**

## WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA

ASAGOO ARKAY Xashidii 1d iyo tii 2d ee Kacaanka 21 Oktobar 1969;

ASAGOO ARKAY Qodobka 1d (xarafka 1) iyo kan 10d (lambarka 3d) ee Xeerka lambarkiisu yahay 52 lana soo saaray 8dii bisha Jun 1972;

ASAGOO ARKAYQodobka 1d ee Xeer Dowladeedka Guddoomiyaah Golaha Sare ee Kacaanka oo lambarkiisu yahay 49 lana soo saaray 8dii bisha febrayo 1973, kaasco lagu dhisay Degmooyinka WAJID, CEEL-WAQ, LUGHAYE, BULO XAWA, BADAHIE, JALALAQSI iyo SHEKH.

ASAGOO OGAADEY Baahida loo qabo in Guddoomiyayaal loo magacaabo Guddiyada Degmooyinka kor ku qoran:

## WUXUU GOOYAY

### Qodobka 1d

Saraakiisha hoos ku qoran waxaa loo mgaacaabay in ay Guddoomiyeyaal ka noqdaan Guddiyada Degmooyinka magacyadooda ku dhinac qoran:

1. Gaashaanle Dahir Qabil Shirwac Guddomiyaha Guddiga Deg. Wajid.
2. L. Xidigle Maxamed Cige Cilmi — Guddoomiyaha Guddiga Deg. Bulo Xawa.
3. L. Xidigle Cabdi Abukar Xasan — Guddoomiyaha Guddiga Deg. Cel Waq.
4. Dhamme Xasan Kulmie Siyad — Guddoomiyaha Guddiga Deg. Badhadhe.
5. L. Xidigle Maxamed Shekh Yusuf — Guddoomiyaha Guddiga Deg. Jalalaqsi.
6. L. Xidigle Axmed Xirsi Cise — Guddoomiyaha Guddiga Deg. Cabud-Waq.

7. L. Xidigle Maxamed Nur Wardhere — Guddoomiyaha Guddiga Deg. Lughaye.

8. Dhamme Maxamed Warsame Malin — Guddoomiyaha Guddiga Deg. Shekh.

Qodobka 2d

Go'aankani si degdeg ah buu u dhaqan geli waana in lagu qoro faafinta resmiga ah ee Dowladda.

Muqdisho, 14 Maggio 1973.

XOGHAYAHA DOWLADDA EE
WARASAADDA ARRIMAHA GUDAHA

*S. Guuto Xusen Kulmie*

*VISTO e registrato - Reg. n. 2, foglio n. 85.*

*Mogadiscio, li 16 Maggio 1973.*

*Il Magistrato ai Conti:*

Magg. ABDULLAHI WARSAME NUR

# BOGGA LABAAD

## TALOOYIN, ISGARSIIN, OGEYSIIS, IYO WAXII LA MID AH

---

### WASAARADDA HAWLAHA GUUD

---

*Baddalaad naado dhul uu leeyahay Jaalle Cabdullahi Shek Yusuf, kuna yaal Muqdisho, xafadda C. Latte T. G. N. 580-62*

Jaallaha kor ku magacaaban, oo horay loo siiyey dhul ku yaal Muqdisho, xafadda C. Latte, kuna fadhiya 2.650 mdh., waxaa la caddeynayaa in looga qaaday danta guud.

Naadadii ee lagu soo diray warqaddi tiradeedu ahyad BF. 580-587-67, waxay isku baddashey sida soo socota:

Dhulka cusubi wuxuu ku yaal Muqdisho, xafadda 21 Oktobar, waxuuna leeyahay qiyaas rektangular 40x30, oo ku fadhiyaa 1.200 mdh., soohdin waxuu la leeyahay;

Waqooyi dhul n. 526 iyo 527; Koofur Jid; Galbeed dhul n. 534; Bari dhul n. 537.

Muqdisho, 15 Maggio 1973.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
*Moxamed Cabdi Sacid*

*(53)*

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

*Baddalaad naado dhul uu leeyahay Jaalle Asma Moxamed Jama, kuna yaal Muqdisho, xafadda wadada Afgoye T. G. 630-68*

Jaallaha kor ku magacaaban, oo horay loo siiyey dhul ku yaal Muqdisho, xafadda wadada Afgoye, kuna fadhiya 3.000 mdh., waxaa la caddeynayaa in looga qaaday danta guud.

Naadadii hore ee lagu soo diray warqaddi tiradeedu ahayd mwd-630-1602-68-296-68, waxay isku baddashey sida soo socota:

Dhulka cusubi wuxuu ku yaal Muqdisho, xafadda 21 Oktobar, waxuuna leeyahay qiyaas rektangular 30x20, oo ku fadhiyaa 600 mdh., soohdin waxuu la leeyaha;

Waqooyi gabal dhul ah L. 689; Koofur Jid; Galbeed gabal dhul ah L. 694; Bari gabal dhul ah L. 696.

Muqdisho, 16 Maggio 1973.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
*Maxamed Cabdi Sacid*

*(54)*

---

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

*Baddalaad naado dhul uu leeyahay Jaalle Samandari Ursula, kuna yaal Muqdisho, xafadda Moxamud A. Xalane T. G. N. 52-60*

Jaallaha kor ku magacaaban, oo siiyey dhul ku yaal Muqdisho, xafadda M. A. Xalane, kuna fadhiya 5.000 mdh., waxaa la caddeynayaa in looga qaaday danta guud.

Naadadii hore ee lagu soo diray warqaddi tiradeed ahayd 1011769-21-4-60, waxay isku baddashey sida soo socota:

Dhulka cusubi wuxuu ku yaal Muqdisho, xafadda 21 Oktobar, waxuuna leeqahay qiyaas rektangular 40x30, oo ku fadhiyaa 1.200 mdh., soohdin waxuu la leeyahay;

Waqooyi gabal dhul ah L. 165; Koofur Jid; Galbeed gabal dhul ah L. 167; Bari gabal dhul ah L. 184.

Muqdisho, 16 Maggio 1973.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
*Moxamed Cabdi Sacid*

*(55)*

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

*Baddalaad naado dhul uu leeyahay Jaalle Sharif Cumar Moxamed iyo dad kale, kuna yaal Muqdisho, xafadda M. A. Xalane T. G. N. 286-65*

Jaallaha kor ku magacaaban, oo horay loo siiyey dhul ku yaal Muqdisho, xafadda M. A. Xalane, kuna fadhiya 2.500 mdh., waxaa la caddeynayaa in looga qaaday danta guud.

Naadadii hore ee lagu soo diray warqaddi tiradeedu ahayd BF-286-317-67-26-2-67, waxay isku baddashey sida soo socota:

Dhulka cusubi wuxuu ku yaal Muqdisho, xafadda 21 Oktobar, waxuuna leeyahay qiyaas rektangular 60x30, oo ku fadhiyaa 1.800 mdh., soohdin waxuu la leeyahay;

Waqooyi Jid; Koofur dhul L. 820, 821 iyo 822; Galbeed dhul L. 813; Bari dhul L.817.

Muqdisho, 16 Maggio 1973.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
*Moxamed Cabdi Sacid*

*(56)*

---

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

*N A A D A   D H U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cali Barre Jama, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka 14-9-1972, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Valle Nord, oo leh qiyaas quadrata (13,5x13,5) kuna fadhiya 182,25 mdh.

Soohdin: Waqooyi Axmed Xaji Jama; Koofur Jid; Galbeed Cali Gure; Bari Jid.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulka waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 19 Maggio 1973.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
*Moxamed Cabdi Sacid*

*(57)*

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

---

## *N A A D A D H U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Moxamud Moxamed iyo Moxamud Cali Abtidon, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka 30-4-1973, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Bur Hindi, oo leh qiyaas rektangualr (38x17), kuna fadhiya 646 mdh.

Soohdin: Waqooyi Jid; Koofur Agonta Xaji Cabdullahi; Galbeed Xasan Nur iyo Shikh Don; Bari Cisman iyo Dahabo Barkhadle.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulka waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 19 Maggio 1973.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka

*(58)* *Moxamed Cabdi Sacid*

---

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

---

## *N A A D A D H U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Xalima Axmed Cabdi, u soo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka 27-7-1968, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda 21ka Oktobar, oo leh qiyaas Trabesiyo, kuna fadhiya 40,60 e 20 (1800) mdh.

Soohdin: Waqooyi Jid ; Koofur Jid; Galbeed Jid; Bari dhul L. 603 iy o16.2.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud; dhulka waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 19 Maggio 1973.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
*Moxamed Cabdi Sacid*

*(59)*

---

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

---

*NAADA DHUL*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Faduma Cumar Xafed, u soo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka 6-4-1966, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Shibis, oo leh qiyaas Rektangular, kuna fadhiya 16x12 (192) mdh.

Soohdin: Waqooyi Jid; Koofur Jid; Galbeed Xaji Moxamed Bari Jid.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulka waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga **bilaabo maantii lugu naadshey buuga** xeerka dawladda.

Muqdisho, 19 Maggio 1973.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
*Moxamed Cabid Sacid*

*(60)*

**WASAARADDA HAWLAHA GUUD**

---

## *N A A D A   D H U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cabduraxman Xaji Diriye, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka 16-5-1973, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Wadajir, oo leh

qiyaas 4 gees isleg (40x40), kuna fadhiya 1600 mdh.
Soohdin: Waqooyi Jid; Koofur Jid; Galbeed gabal dhul lam. 2398-2290; Bari Jid.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulka waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 19 Maggio 1973.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka

*(61)* *Moxamed Cabdi Sacid*

**DUQA MAGAALADA XAMAR Wuxuu Dejinayaa Xeer soo Socda**

**20 Maggio 1973, L. 62.**

MARKII uu arkay go'aanka 1 iyo kan 2 ee Kacaanca 21 Oktobar;

MARKII uu arkay Sharciga tiradiisu tahay 121 oo soo baxay 17kii Disembar 1972 kuna saabsan dhismaha Dawladda Hoose ee Xamar;

MARKII uu arkay Sharciga tiradiisa tahay 52da oo soo baxay 8dii Junyo 1972dii kuna saabsanaa Dawladda Hoose;

MARKII uu arkay qodobka 21d ee Sharciga tiradiisu tahay 52d oo soo baxay 8dii Junyo 1972dii kaasoo amrayey in la dhiso Guddi horumarinta dhaqaalaha Xaafadda ka mas'uul ha;

MARKII uu ogaaday in Xaafaduhu dhibaatooyin badan ay qabaan xagga dhaqaalaha ayna lagama maarmaan tahay in si degdeg ah wax looga qobto;

MARKII uu ogaaday in loo baahan yahay in mashaaric horumarin ha laga hirgeliyo Xaafad walba;

MARKII uu ogaaday iney san fudadayn in dadka had iyo jeer iskaa wax u qabso wax lagaga radsho;

ISAGOO la socda wax kaalmo ah inaysan xagga dhaqaalaha ah Dawladda Hoose ee Xamar Xaafadaha siinin, wax mashaaric ah oo laga qabto mooye eh;

IYADOO ay lagama maarmaan tahay iney Xaafaduhu miisaaniyad gaar ah yeeshaan si ay isku maamulaan keli ahaantood;

MARKII uu arkay go'aankii Guddiga Magaalada Xamar ee 27kii bisha Abrile 1973.

WUXUU DEJINAYAA XEERKA SOO SOCDA

Qodobka 1

b) guryaha daaraha ah ee Xaafadda ku yaal bishii 2 (laba) Shilin in laga qaado gurigii walba kuwa baraakooyinka ahna gurigiiba 1 (Hal) Shilin Carshaantana 50 (Nus) Shilin;

t) daaraha waxaa loola jeedaa guri alaale gurigii lagu dhisay dhagax ama Bulukeeti korka wax kastaa ha ka saaraadeene;

j) Baraakada waxaa loola jeedaa guri alaale gurigii alwax ka dhisan;

x) Carish waxaa loola jeedaa guri alaale gurigii dhis ka sameeysan;

Qodobka 2

b) Shatiyada baayac mushteriga ah qofkii leh Shatiga kowaad iyo kan labaad wuxuu bixinayaa 2 (laba) Shilin bishii;

t) qokii leh Shatiga saddexaad iyo kan afraad wuxuu bixinayaa 1 (Hal) Shilin bishii;

j) qofkii leh Shatiga shanaad, lixaad iyo kan toddabaad wuxuu bixinayaa 50 (Nus) Shilin bishii;

Qodobka 3

Quryaha iskaa waxu qabsada laga qaadayo waxaa loola jeedaa albaabka weyn ee guriga laga soo galo;

Qodobka 4

Lacagta iskaa waxu qabsada ee guryaha laga qaado waxaa bixinaya qofka guriga leh wuxuuna u dhiibayaa qofka i jaarka ugu jira;

Qodobka 5

Guryaha ay Dawladdu leedahay waxaa bixinaya qofka i jaarka ugu jira;

Qodobka 6

Guryaha dadka Safaarooyinka ahi ku jiraan waxaa bixinaaya qofka guriga leh iyagase waaxba la weydiin maayo;

Qodobka 7

Markaas in la joojiyo iskaa wax qabso ahaan looga gurayey Xaafadaha. Haddii ay lagama maarmaan noqoto waa in la weydistaa amar Duqa Magaalada Xamar;

## HABKA MAAMULKA LACAGTA

### Qodobka 8

Xaafad walba Bangiga waa inay ka furato Buug xisaabed oo u gaar ha iyada;

### Qodobka 9

Markii lacag laga soo qaadayo Bangiga waa inay wada saxiixaan Guddoomiyaha Guddiga Xaafadda iyo Guddoomiyaha Guddiga dhaqaalaha;

### Qodobka 10

Kharajka ku siman laba boqol (200) oo Shilin waxaa awood u leh inay bixiyaan Guddomiyaha Guddiga Xaafadda iyo Guddoomiyaha dhaqaalaha;

### Qodobka 11

Kharajka ka badan 200 (laba boqol) oo Shilin 500 (shan boqol) oo Shilin waxaa biuxin kara Guddiga dhaqaalaha Xaafadda oo uu weheliyo Guddooriyaha Guddiga Xaafaddu iyo Xoghayaha;

### Qodobka 12

Kharajka ka badan shan boqol (500 oo Chilin ilaa 10 (kun) oo Shilin waxaa bixin kara Guddiga Xaafadda oo dhan;

### Qodobka 13

10 (kun) oo Shilin wixii ka markay isku raacdo Guddiga Xaafaddu waa in la hor keenaa Duqa Magaalada Xamar;

### Qodobka 14

Mar kasta oo Guddiyaashu lacag bixinayaan waxaa lagu soconayaa inta badanni waxay isku raacdo;

Qodobka 15

Waa in bishii walba Xaafad kastaa ay u soo dirtaa Xaiiska Maamulka Guud ee Dawladda Hoose ee Xamar, xaashi caddeyneyasa wixii lacag ay qabteen iyo wixii ay bixiyeen;

Qodobka 16

Markii guryaha lacag qaadaba waa in la siiyaa warqad caddeyneysa lacagta laga qaaday;

Qodobka 17

Qofkii lacagtaas vixinteeda waxaa la ganaaxayaa 200 Shilin ilaa 500 Shilin ama saddex bilood oo xaring ah, iyadoo lala tiigsanayo Sharciga u dhigan Dawladda Hoose awaamirteeda qofkii diida;

Qodobka 18

Qofkii ay caddaato in uusan lacagtaas bixin kareyn Guddiga Xaafadda ayaa ka dhaafi kareysa, iyagoo siinaya warqad sidoos caddeyneysa;

Qodobka 19

Sharcigan, Sharci kasta oo ka gedisan waa la baabi'iyey lagumana maamuli karo Xaafadaha markii Sharciganu hirgalo;

Qodobka 20

Sharciganu wuxuu hirgelayaa markii la saxiixo.

Muqdisho, 20 Majo 1973ka.

Duga Magaalada Muqdisho oo Kumeel Gaarka ah

(62) *Dhamme Xaasan Abshir Farah*

**IMMOBILE SOMALA SOCIETA' PER AZIONI — I.S.S.A.**
**oo Saldhigeedu yahay Mudqisho — Jumhuriadda Dimoqradiga Somaliya**
**Ra's maalkeeduna yahay Shs. So. 200.000,00**

---

## OGEYISIIS ISU IMAATIN GUUDNIMO OO CAADI AH

Dadka qaybaha ku leh Sharikada «Immobiliare Somala Società per Azioni — I.S.S.A.» oo Saldhugeedu yahay Muqdisho, waxaa la weydiisanaaya inay ka soo qayb galaan shir guudnimo oo caadi ah laguna qaban doono magaalada Xamar, Xafiiska Rag. Salvi, maalinta 25ka June 1973 saacadu 9ka subaxnimo.

Waxyaabaha shirkaa lagaga wada hadli doonaa waxa weeye:

1) Xoog warrankii Maamulaha Guud;
2) Hoo dhig Baarayaasha Sharkada;
3) Magacaabid Maamulaha Guud ee Baarayaasha Sharkada.

Waxaa xaq u leh inay ka soo qayb galaan fadhigaa dadka ku qoran buuga Sharikada illa shan beri ka hor maailnta laysu imaanaayo.

Muqdisho, 26 Maggio 1973.

*(63)* MAAMULAHA GUUD

---

**LIBAH — S. r. l. — oo Shaldhigeedu yahay Kismayo**
**Jumhuriyadda Dimoqradiga Somaliya**
**Ra's malkeeduna yahay Shs. So. 210.000,00.**

---

## OGEYISIIS ISU IMAATIN GUUDNIMO OO CAADI AH

Dadka qaybaha ku leh Sharikada «Società a responsabilità limitata «LIBAH», oo saldhigeedu yahay Kismayo, waxaa la weydiisanaaya inay

ka soo qayb galaan shir guudnimo oo caadi ah laguna qaban doono magaalada Xamar, Xafiiska Rag. Salvi, maalinta 24ka June 1973, saacadu 11ka subaxnimo, hadii shirkaasoo suura geli waayo maalinta 24ka waxaa mar labaad laysu imaan doonaa 30ka June, saacadu 9ka subaxnimo.

Waxyaabaha shirkaa lagaga wada hadli doona waxa weeyee:

1) Xoog warrankii Maamulaha Guud iyo Baarayaasha Shirkada;

2) Hoor dhig xaanshida miisaaniyada Ganacsiga iyo Dheef iyo Daynta ee ku eg 31-12-1972 ee wax alah wixii kale ee falanqayn u baahan;

3) Magacaabid Maamulaha Guud ee Baarayaasha Sharkada.

Waxaa xaq u leh inay ka soo qayb galaan fadhigaa dadka ku qoran buuga Sharikada illa shan beri ka hor maalinta laysu imaanaayo.

Muqdisro, 26 Maggio 1973.

*(64)* MAAMULAHA GUUD

---

«MORODI» — S. p. A. — oo Sadhigeedu yahay Mugdisho
Jumhuriaydda Dimoqradiga Somaliya
Ra's maalkeeduna yahay Shs. So. 2.000.000,00

---

OGEYISIIS ISU IMAATIN GUUDNIMO OO CAADI AH

Dadka qaybaha ku leh Sharikada «MORODI» — S.p.A. oo Saldhigeedu yahay Muqdisho, waxaa la weydiisanaaya inay ka soo qayb galaan shir guudnimo oo caadi ah laguna qban doono magaalada Xamar, Xafiiska Rag. Salvi, maalinta 23ka June 1973, saacadu 9ka subaxnimo, hadii shirkaasoo suura geli waayo maalinta 23ka June 1973 waxaa mar labaad laysu imaan doonaa 30ka June 1973, saacadu 9ka subaxnimo.

Waxyaabaha shirkaa agaga wada hadli doonaa waxa weeyee:

1) Xoog warrankii Gudiga Maamulka Guud iyo Baarayaasha Shirkada;

2) Hoor dhig xaansbida miisaaniyada Ganacsiga iyo Dheef iyo Daynta ee ku eg 31-12-1973 ee wax alah wihii kale ee falanqays u baahan.

Waxaa u leh inay ka soo qayb galaan fadhiga dadka k u qoran buuga Sharikada illa shan beri ka hor maalinta laysu imaanaayo, ama se, kuwa dhigai qaybahoodi xarunta Sharikada.

Muqdisho, 26 Maggio 1973.

*(65)* GUDIGA MAAMULKA GUUD

---

**SOCIETA' INCREMENTO PRODUZIONI AGRICOLE — S.I.P.A. — S.p.A.**

**oo Saldhigeedu yahai Shalambot, Jumhuriyadda Dimoqradiga Somaliya**

---

## OGEYISIIS ISU IMAATIN GUUDNIMO OO CAADI AH

Dadka qaybaha ku leh Sharikada «Società Incremento Produzioni Agricole — S.I.P.A.» oo Saldhigeedu yahay Shalambot, waxaa la weydiisanaaya inay kasoo qayb galaan shir guudnimo oo caadi ah laguna qaban doono magaalada Torino, Via Don Minzoni 8, maalinta 20 ka June 1973, saacadu 10ka subaxnimo, hadii shirkaasoo suura geli waayo maalinta 20ka waxaa mar labaad laysu imaan doonaa 30ka June saacadu 10ka subaxnimo.

Waxyabaha shirka lagaga wada hadli doonaa waxa weeyee:

1) Xoog warrankii Gudiga Maamulka Guud iyo Baarayaasha Shirkada.

2) Hoor dhig xanshida miisaaniyada Ganacsiga iyo Dheef iyo Daynta ee ku eg 31-12-1972 ee wax alah wihii kale ee falanqays u baahan.

Waxaa u leh inay ka soo qayb galaan fadhiga dadka ku qoran buuga Sharikada illa shan beri ka hor maalinta laysu imaanaayo, ama se, kuwa dhigai qaybahoodi xadunta Sharikada.

Muqdisho, 26 Maggio 1973.

(66) GUDIGA MAAMULKA GUUD

---

**A.S.E.I. — AZIENDA SOMALA ELETTRO-INDUSTRIALE — S.p.A.**
**oo Saldhigeedu yahay Brawe — Jumhuriyadda Dimoqradica Somaliya**
**Ra's maalkeeduna yahay Shs. So. 200.000,00**

---

## OGEYISIIS ISU IMAATIN GUUDNIMO OO CAADI AH

Dadka qaybaha ku leh Sharikada «A.S.E.I. — Azineda Somala Elettro-Industriale - S.p.A.» oo Saldhigxdu yahay Barawe, waxaa la weydiisanaaya inay ka soo qayb galaan shir guudnimo oo caadi ah laguna qaban doono Saldhiga Sharikada, maalinta 22ka June 1973 saacadu 9ka subaxnimo, hadii shirkaasoo suura geli waayo maalinta 22ka June waxaa mar labaad laysu imaan doonaa 29ka June 1973, saacade 9ka subaxnimo.

Waxyaabaha shirkaa lagaga wada hadli doonaa waxa weeyee:

1) Xoog warrankii Gudiga Maamulka Guud iyo Baarayaasha Shirkada.

2) Hoor dhig xaanshida miisaaniyada Ganacsiga iyo Dhef iyo Daynta ee ku eg 31-12-1972 ee wax alah wixii kale ee falanqays u baahan.

3) Magacaabid Gudiga Maamulka Guud ee Baarayaasha Sharikada.

Waxaa xaq u leh inay ka soo qayb galaan fadhiga dadka ku èoran buuga Sharikada illa shan beri ka hor maalinta laysu imaanaayo, ama se, kuwa dhigai qaybahoodi xaruunta Sharikada.

Muqdisho, 26 Maggio 1973.

*(67)* GUDIGA MAAMULKA GUUD

---

**SOCIETA' AGRICOLA BULO MERERTA — SABUM — S.p.A.**
**oo Saldhigeedu yahay Shalambot, Jumhuriyadda Dimoqradiga Somaliya**
**Ra's maalkeeduna yahay Shs. So. 12.000,00**

---

OGEYISIIS ISU IMAATIN GUUDNIMO OO CAADI AH

Dadka qaybaha ku leh Sharikada «Società Agricola Bulo Mererta — SABUM — S.p.A.» oo Saldhiggedu yahay Shalambot, waxaa la weydiisanaaya inay ka soo qayb galaan shir guudnimo oo caadi ah laguna qaban doono magaalada Shalambot, Xafiisyada S.I.P.A., maalinta 22ka June 1973, saacadu 11ka subaxnimo, hadii shirkaasoo suura geli waayo maalinta 22ka June 1973 waxaa mar labaad laysu imaan doonaa 29ka June, saacadu 11ka subaxnimo.

Waxyabaha shirkaa lagaga hadli doonaa waxaa weeyee:

1) Xoog warrankii Gudiga Maamulka Guud iyo Baarayaasha Shirkada.

2) Hoor dhig xanshida miisaaniyada Ganacsiga iyo Dheef iyo Daynta ee ku eg 31-12-1972 ee wax alah wixii kale ee falanqays u baahan.

Waxaa xaq u leh inay ka soo qayb galaan fadhiga dadka ku qoran buuga Sharikada illa shan beri ka hor maalinta laysu imaanaayo.

Muqdisho, 26 Maggio 1973.

*(68)* GUDIGA MAAMULKA GUUD

**SHIRKADDA HILIBKA EE «SOPRAL» — S.p.A.**

**Oo Saldhigeedu yahay Muqdisho — Ra's malkeeduna yahay Shs. So. 1.000.000,00**

---

## OGEYISIIS ISU IMAATIN GUUDNIMO OO CAADI AH

Dadka qaybaha ku leh Shirkada SOPRAL - S.p.A. — oo saldhigeedu yahay Muqdisho, waxaa la weydiisanayaa inay ka soo qayb galaan shir guudnimo oo cadi ah laguna caban doono saldhiga Shirkadda ee ku yaala jidka ALMA ATA, maalinta 20da June 1973 10ka subaxnimo. Haddii shirkaasu sura geliwaayo maalintaas, waxaa mar labaad laysu iman doona 28da June 1973 isla saacaddi iyo isla meeshii, waxaana laga wada doona waxyaabaha soo socda:

## WAXA LAGA HADLAYO

1) Xog warrankii Gudiga Mamulka Guud iyo Baarayaasha.

2) Hor dhiga Haashida Miisaniyada iyo Dheef iyo Khasaaro ee ku eg 31-12-1972 iyo wixii go'aana ee la xirira.

Waxaa xaq u leh inay ka soo qayb galaan fadhiga dadka ku qoran buuga Shrikada illa 5 beri ka hor maalinta laysu imanayo, ama se, kuwa dhigey qaybahoodi Bangi ku yal Muqdisho, ama Xarunta Shrikadda.

*(69)* GUDIGA MAMULKA GUUD

**MAXKAMADDA GOBOLKA BENADIR**

---

Waxaan aqriyey dacddaan;

Markaan arkey waxay ku saabaantahay iyo ogeysiiskii bangiga kaydisga iyo deynta waxan ogaadel inay ka tirsan tahay shaqadda xafiskan;

Arkay cadeynaayaa dhimiddii jegge lambarisu yahay 4692 Sh. So. 500/- (shanboqol);

Waxan amrayaa in loo sameeyo jeegaas naagata la yiraxdo Xalima Salex Naaji, mudda 15 beri ah, oo ay ka billabata maaliinta la gu shaxiyo Bollettino Ufficiale dawladda, hadaan qof kale oo ku sheganayaa usan jirin.

Waxaa kaloo la codsanayas in jeggaas gacanta laga saaro gabha ko ku qoran ama qof kale oo ka sita wakaaladda shaki aan lahay, iyadoo la sugayo 15 kas beri oo kor ku qoran.

Xamar, 10 Maggio 1973.

GARSORE

*(70)* *Xussen S. 'Cabduraxman*